



Madison High School



Fasallada AP, Tubta Xirfadaha-Farsamada, Isboortiga, Naadiyada, Aqoonyahannada Sanatarka, Robootikada, Injineerinka, Caddayn baaridda, Sayniska Biyomediga, Farshaxanka, Muusiga, Riwaayadaha, Barashada Isbaanishka... Ku soo dhowow qeybta bilowga xaafaddaada.

Madison High School waa mid ka mid ah dugsiyada sare ee qowmiyadaha kaladuwan ee gobolka Oregon, taasoo ka dhigaysa nolosha xerada mid hodan ah iyadoo ardayda siisa aragtiyo kala duwan maalin kasta. Madison, ardaydeena iyo qoysaskeenu waxay ku hadlaan in ka badan 30 luqadood oo adduunka ah oo ay ku jiraan Soomaali, Isbaanish, iyo Fiitnaam. Waxaan ku dadaalnaa inaan abuurno jawi soo dhaweyn leh oo ardaydeena cajiibka ah ay iskaashi kala sameyn karaan macallimiinta xiisaha leh. Himiladayada Madison waa inaan u abuurno jawi himilooyin tacliin sare iyo feejignaan shakhsi ahaaneed ee arday kasta oo Madison ah.



HI Adam Skyles, Maamule

CASRIYEYNTA MADISON

Madison High School waa mid ka mid ah 3 dugsi sare ee PPS ee la casriyeeyay iyadoola adegsanayo Deymihii guusha lahaa ee Maajo 2017. Sanadka 2021, Madison High School oo si buuxda loo casriyeeyay oo 292,000 dhudhun laba jibbaaran ah ayaa dib loo furi doonaa iyadoo uu qaadi karo 1,700 arday. Casriyeynta Madison waxaa ka mid noqon doona in ka badan 170,000 oo fiit oo laba jibbaaran oo dhismo cusub ah, oo ay ku jiraan tiyaatar, shaybaarro takhasus u leh farshaxanka dhijitaalka ah, nashqadda dhijitaalka ah, injineernimada, robootikada, cilmiga bayoolajiga, dhismaha, beeraha waara, marka lagu daro goob cusub oo sameeyeyaal cusub ah.



Dr. Keylah Boyer, Maamule Xige



Travis Johnson, Maaamule Xige

CREED

COMMUNITY • RESPECT • EDUCATION • EQUITY • DIVERSITY

MADISON HIGH SCHOOL at Marshall Campus
3905 SE 91st Ave., Portland, Oregon

Taleefan 503 916-5220 | Fax: 503-916-2702 | www.pps.net/schools/madison



Madison waa Bulsho is ixtiraamaysa, Waxbarshadana ixtiraamta iyada oo loo marayo Sinaan si loo sharfo laguna xoojiyo dadkeenna kala duwan xirfado iyo qalab lagama maarmaan u ah dhammaan ardayda inay qalin jabiyaan oo ay ku guuleystaan kuleejka iyo shaqada.

KAQEYBGALINTA WAXBARASHADA

Koorsooyinka Meelaynta Hore & Dhibcooyinka Labaaleyaasha

Koorsooyinka Meelaynta Hore (AP) waa koorsooyin heer kuleejo ah oo la bixiyo inta lagu jiro dugsiga sare. Koorsooyinkan waxaa abuuray macallimiin jaamacadeed/kuleejo si ay uga tarjumaan waxa lagu barayo fasallada kuleejada sannadka koowaad. Tani waa fursad weyn oo kuu suurtagalinayso inaad kasbato dhibcaha kuleejada hadaqa ka gudubto imtixaanka AP. Koorsooyinka Laba-dhibcaalaha ah waxay ardayda siiyaan fursad ay ku kasbadaan dhibcaha kuleejka isla mar ahaantaana ay helaan dhibcaha dugsiga sare. Madison waxay bixisaa koorsooyin AP ee Sayniska Bey'ada, Kalkulas AB & BC, Suugaanta iyo Dhaqanka Isbaanishka, Luqadda iyo Dhaqanka Isbaanishka, Luqadda iyo Curiska, Fiisigiska, Kimistariga, Sayniska Kombiyuutarka, Juqraafiga Aadanaha, Suugaanta iyo Curiska, Bayoolajiga, Tirakoobka, Xukuumadda, Cilmi-nafsiga, iyo Taariikhda Mareykanka. Markaad ku gasho kuleejka dhibcaha ardayda waxay awoodi karaan inay ku qalin jabiyaan waqti yar ama ay qaataan koorsooyin heer sare ah sida ugu dhakhsaha badan. Madison waxay bixisaa koorsooyin Meelaynta Sare iyo koorsooyin Laba-dhibcoolaha ah iyagoo la kaashanayo Clackamas Community College, Oregon State University, Portland Community College, Portland State University iyo Oregon University.

Akhriska iyo Qoraalka Afka Soomaaliga, Barashada Isbaanishka, iyo Afafka Adduunka

Madison waxay bixisaa afsoomaaliga si Barashada Afka Hooyo ahaan ah oo loogu talagalay in lagu kordhiyo aqoonta ardayda ee luqadda Soomaaliga iyo fasaaxadooda iyadoo loo marayo afarta qaybood ee xirfadaha isgaarsiinta: akhriska, qorista, ku hadalka, iyo dhageysiga. Intaa waxaa dheer, barnaamijkeenna Barashada Isbaanishka wuxuu ka caawiyaa ardayda inay horumariyaan akhriska, qorista, iyo ku hadalka afka. Luuqadaha adduunka ee lagu bixiyo Madison waxaa ka mid ah: Mandarin Shiineys, Faransiis, iyo Isbaanish.

Horumarka Loo maro Go'aaminta Shakhsiyeed (AVID)

Madison High School wuxuu ahaa dugsigii ugu horreeyay ee Oregon ee hirgeliya AVID inta lagu gudajiray sanad dugsiiyeedkii 2005-2006. Madison waa dugsiga kaliya ee sare ee Portland Public Schools ee loo aqoonsan yahay inuu yahay Dugsi Tayo SARE ee AVID (AVID School of Distinction). Waxaan hirgelineynaa Nidaamka Diyaargarowga Kuleejada AVID ee iskuulka oo dhan, taas oo macnaheedu yahay macallimiinta Madison waxay adeegsanayaan xeeladaha AVID dhammaan casharada. Hiigsiga AVID waa in la xiro farqiga u dhexeeya fursadaha iyadoo loo diyaarinayo dhammaan ardayda u diyaarsanaanta kulliyadda iyo guusha bulshada adduunka. Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg bogga internetka ee AVID <http://www.avid.org/>.

Barashada Xirfadaha iyo Farsamada

Bixinta barnaamijka Madison CTE waxaa ka mid ah noocyo kala duwan oo maadooyin ah oo u oggolaanaya ardayda inay toos u helaan mahado barasho iyo inay yeeshaan xirfado loo adeegsan karo tubo badan oo xirfadaha mustaqbalka ah. Barnaamijyada CTE waxay ardayda dugsiga sare u fidiyaan casharo casri ah, oo khuseeya, oo adag kuwaas oo u diyaarinaya fursadaha dugsiga sare kadib iyo mushahar sare, xirfad sare, iyo shaqooyin baahi badan loo qabo. Barnaamijyada Madison CTE waxaa ka mid ah Ganacsiga, Sayniska Kombiyuutarka, Dhismaha, Naqshadeynta & Farshaxanka, Naqshadeynta Dijital ah, Injineerinka, Barayaasha Mustaqbalka, Sayniska Caafimaadka, iyo Beeraha Waara.

Inta lagu jiro sanad-dugsiiyeedka 2021-2022, ardayda Madison waxay ku laaban doonaan dhisme casriyeysan oo ay ku jiri doonaan shaybaarro gaar ah oo loogu talagalay naqshadeynta iyo farshaxanka la adeegsaday, naqshadeynta dhijitaalka ah, injineernimada, robootikada, cilmiga bayoolajiga, iyo dhismaha, beeraha waara iyo goob cusub oo samayn oo la wadaago. Intaa waxaa dheer, waxaa jira Meelaynta Hore iyo sidoo kale xulashooyin laba-dhibcood ah oo loogu talagalay dhowr ka mid ah barnaamijyadayada CTE ee lagu bixiyo Portland Community College, Clackamas Community College, iyo Portland State University. Tani waxay ardayda siineysaa fursad ay ku kasbadaan dhibcaha dugsiga sare iyo kuleejka. Fadlan eeg Tilmaamaha Koorsada Madison iyo Buug-yaraha CTE wixii faahfaahin dheeraad ah.

CIYAARAHA FUDUD

Madison High School wuxuu ku dhiirrigeliyaa dhammaan ardayda inay ka qayb galaan ciyaaraha fudud! Si aad ugu biirto koox, ardaydu waa inay buuxiyaan shuruudaha akademiyeed oo ay diiwaangeliyaan caddeynta imtixaanka xaaladda jireed ee hadda si ay ugu qalmaan. Foomamka dheeraadka ah iyo khidmadaha ayaa sidoo kale loo baahan yahay in la soo gudbiyo si looga qayb qaataan. Beesbaal, Kubadda Koleyga, Sacab tumidda, Orod tanka, Qoobka-ciyaarka, Gubadda Gacanta, Golofka, Kubadda Cagta, Kubadda jilicsan, Dabaasha, Teeniska, Waddada & Garoonka, Kubadda Laliska, iyo Legdinta

BARNAAMIJKA IXTIRAAMKA DAMIAN LILLARD

Barnaamijka IXTIRAAM ee Damian Lillard wuxuu ku dhiiri gelinayaa dhamaan dhalinyarada inay Is Muujiyaan, Dadaalaan oo ay Naxariis Yeeshaan. Iyada oo loo marayo barnaamijkiisa IXTIRAAMKA, oo markii hore la bilaabay xilli ciyaareedkii 2012-2013 markii uu ahaa NBA kuruud ah, wuxuu ku dhiirrigeliyaa dhalinyarada inay u muujiyaan ixtiraamka dadka oo dhan. Madison waa mid ka mid ah saddexda Dugsi Sare ee aagga Portland ee Lillard uu doortay inuu xoogga ku saaro dadaalkiisa si uu si uu u dhiirrigeliyo joogtaynta dhaqanka ixtiraam leh ee dhalinyarada. Sannadka oo dhan, macallimiinta iyo la-taliyayaasha ayaa awood loo siin doonaa inay ku abaal-mariyaan ardayda muujiyey mabaadi'da IXTIRAAMKA tikidhada ciyaaraha Trail Blazers; Waxyaabaha uu saxiixay Lillard, badeeco Ixtiraam, iyo waxyaabo kale oo gaar ah.

BANDHIGGA FARSHAXANKA

Madison waxay ardayda u siisaa xulashooyin kala duwan oo bandhigga farshaxanka ah oo ay ka mid yihiin: Drumline, Fanaaniinta Madison, Baandeyda Simfonik, Kooxaha Wind, Tiyaatarka bilow iyo dhex dhexaad, Tiyaatarka iyo jilistaanka - horumarsan, Teknolojiyadda Tiyaatarka, iyo Kooxda Jazz.

DHAQANADA SOO-CELINTA

Madison waxay isticmaashaa dhaqamada soo celinta si ay u bixiso taageero si loo dhiso loona ilaaliyo cilaaqaadka caafimaadka leh si loo abuur bulsho dugsiiyeedka oo dhan oo taageero iyo fasallo loo dhan yahay leh. Dhaqan celinta waxay xoojineysaa Waxqabadyada iyo Taageerada Dabeecadda Wanaagsan (PBIS), dhaqamada argagaxa ay keeneen, qaababka barashada bulshadeed iyo shucuureed, iyo kooxaha Cimilada Dugsiga, iyagoo gacan ka geysanaya dhismaha aasaaska daryeelka, aqbalida, iyo sinnaanta dugsiyada.

BARNAAMIJKA AQOONYAHANADA HORUMARSAN (ADVANCED SCHOLARS PROGRAM)

Barnaamijka Madison Advanced Scholars waa fursad waxbarasho kobcin oo adag oo la siiyo ardayda dhigata Madison High School. Barnaamijku wuxuu isku dayaa inuu ardayda ku xujeeyo inay gaaraan awooddooda buuxda isla mar ahaantaasna u diyaariyaan kuna taageeraan sidii ay ugu guuleysan lahaayeen kuleejada. Hagayaasha Madison Advanced Scholars waxay ka caawisaa ardayda inay dejiyaan yoolal iyo qorshe guul gaara.

MADISON HIGH SCHOOL at Marshall Campus
3905 SE 91st Ave., Portland, Oregon
Phone: 503 916-5220 | Fax: 503-916-2702
www.pps.net/schools/madison

Portland Public Schools waa shaqaalaysiiye iyo bare loo siman yahay.